Australian Government

COVID-19 VACCINATION

Foomka oggolaanshaha ee tallaalka COVID-19

Kahor inta aanad buuxinta foomkan hubi inaad akhridey warqada macluumaadka ee kujira tallaalka aad qaadandoontid:Vaxzevria (AstraZeneca),Comirnaty (Pfizer) ama Spikevax (Moderna).

Markii ugu dabeysey ee la cusbooneysiiyo: 8 October 2021

Ku saabsan tallaalka COVID-19

Dadka qaata tallaalka COVID-19 waxay leeyihiin fursad aad u yar oo ay ugu xanuunsan karaan COVID-19.

Waxaa jira saddex nooc ootallaal ah. laga isticmaalo Australiya. Dhamaan waa kuwo waxtar leh oo ammaan ah. Pfizer ama Moderna ayaa laga doorbiday AstraZeneca ee dadka dhaliyarada ah ee ka yar 60 sannadood.

Waxaad u baahan tahay inaad qaadatid laba qaybood nooc tallaal isku mid ah. Marka aad qaadatid dhooska koowaad, ayaa laguu sheegi doona goorta dhooskaaga labaad noqondoono.

Dadka sida aadka ah difaaca jidhkoodu u hooseeyo (severely immunocompromised) waxay u baahan karaan dhoos saddexaad oo qayb ka ah koorsadooka asaasiga ah. Eeg www.health.gov.au/resources/publications/atagi-recommendations-on-the-use-of-a-third-primary-dose-of-covid-19-vaccine-in-individuals-who-are-severely-immunocompromised

Khubaro caafimaad ayaa darsay tallaalka COVID-19 si loo hubiyo inay nabadd yihiin. Dhibaatooyinka soo raaca badankoodu waa kuwo fudud oo aan sii socon muddo dheer. Waxay bilaabi karaan maalinta tallaalka mana waxaana ay sii socodaan maalin ama labamaalmood. Sida tallaal kasta ama dawo kasta, waxaa jiri kara waxyeelo naadir ah ama aan la aqoon.

Saameyn aad u dhif ah ka dib AstraZeneca oo loo yaqaano thrombosis with thrombocytopenia syndrome, ama TTS. Taa micnaheedu waa xinjirowga dhiigga (thrombosis) ee la socoto heerka belatiska dhiiga hooseeya (thrombocytopenia). TTS madhacdo ka dib Pfizer ama Moderna.

Myocarditis iyo pericarditis (bararka wadnaha) ayaa la soo sheegay Pfizer iyo Moderna. Kiisaska badankoodu waxay ahaayeen kuwo khafiif ah oo dadku si dhakhso ah ayay u bogsadeen.

U sheegi daryeelka caafimaadka haddii aad isku aragtid waxyeellooyin tallaka kadib oo aad ka walwalsan tahay.

Waxaa lagaala soo xidhiidhi karaa SMS ama emyl wiiga gudihiisa kadib markaad qaadatid tallaalka si aad u eegtid sida aad dareemeysid.

Magaca:												
Lambarka Medicare:												

Dadka qaarkii waxaa laga yaabaa inay qadaan COVID-19 tallaalka ka dib. Waa inaad wali raacdaa dhamaan tallooyinka caafimaadka bulshada sida looga baahan yahay gobolkaaga ama taritorigaaga si aad u joojisid faafitaanka COVID-19 oo ay ku jiraan:

- Ku dhaqanka ka fogaanshaha masaafadaada - ugu yaraan ka fogow 1.5 mitir dadka kale
- maydh gacmahaaga inta badan iyadoo la isticmaalayo saabuun iyo biyo, ama isticmaal gacmo nadiifiyaha
- xiro maaska
- joog gurigaaga haddii aanad caafimaad qabin ama aad yeelatid astaamaha hargabka ama dureyga oo kale oo isku day inaad sameysid baadhitaanka COVID-19.

Sharci ahaan, qofka bixinaya tallaalkaagu waa inuu diiwaangeliyaa taa waxay ku qoraan Diiwaanka Talaalka,. Waxaad ka arki kartaa diiwaanka tallaalka khadka tooska ah iyada oo loo marayo:

- Akowankaaga Medicare
- Akowankaaga MyGov
- Akowankaaga My Health Record.

Sidee macluumaadkaaga loo adeegsadaa

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida macluumaadkaaga shakhsiyeed loo ururiyo, loo kaydiyo loona istcimaalo booq www.health.gov.au/using-our-websites/privacy/privacy-notice-for-covid-19-vaccinations.

Haddii aad ka qaadaneysidtallaalkaaga Farmasiga, Farmasilaha waa inuu u gudbiyaa qaar ka mid ah macluumaadkaaga shakhsiyeed Maamulaha Barnaamijyada Farmashiyaha (Pharmacy Programs Administrator). Tani waxaa loo sameeyey si Farmasiigu ugu dalban karo lacag bixinta Dowladda Australiya. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sababta tan loo baahan yahay iyo waxii macluumaad la wadaagey waxaa lagu bixiyaa xidhiidhka kore.

Maalinta aad qaadatid tallaalkaaga

Kahor intaanad is tallaalin, u sheeg qofka ku siinaya tallaalka haddii aad:

- wax xasaasiyad ah yeelatay, gaar ahaan dareen-celin xasaasiyadeed oo daran (anaphylaxis):
  - qiyaasta hore ee tallaalka COVID-19
  - qayb ka mid ah tallaalka COVID-19
  - tallaallada kale ama daawooyinka

- aad isdifacaaga jidhku uu daciif Yahye (immunocompomised). Taas macnaheedu waxa weeye inay leedahay tabar daciif ah oo kugu adkaynayso inaad. Wali waad qaadan kartaa tallaalka COVID-19, laakiin la hadal dhakhtarka waxa ku saabsan marka aad heleysid talaakaaga . Tani waxey ku xidhan tahay xaaladaada iyo daweyntaada.

Magaca:												
Lambarka Medicare:												

Liiska aftida

Haa	Maya	
☐	☐	Xasaasiyad miyaad ka qaadey qaybtii hore ee tallaalka COVID 19?
☐	☐	Ma ku yeelatay xasaasiyadeed (anaphylaxis) tallaal kale ama dawooyin?
☐	☐	Miyuu ku dhacday xaalad xun oo daran, in dib u eegista khabiir tallaabka bixintiisa ama takhasus ku heysta daweynta loo nisbeeyay qaybtii hore oo tallaalka COVID-19 ah (iyo inaan sabab kale la helin)?
☐	☐	Waligaa ma kugu dhacey mastocytosis (isbadel unugyada oo badan) kaas oo kugu keeney xasaasiyad soo noqnoqata (recurrent anaphylaxis)?
☐	☐	Miyaad hore u qaadey COVID-19?
☐	☐	Ma leedahay cillad dhiig-bax ah?
☐	☐	Ma qaadataa wax dawo ah oo dhiiggaaga khafiifiya (daawada xinjirowga lidka ku ah)? (anticoagulant therapy)?
☐	☐	Ma leedahay difaaca jirka oo daciifa (immunocompromised)?
☐	☐	Ma uur baad leedahay? *
☐	☐	Madaa xanuunsanad oo la hayad qufac, dhuun xanuun, xumad ama si kale ayaad u xanuunsanaysaa?
☐	☐	Miyaad horay u qaadatay tallaalka COVID-19?
☐	☐	Miyaad qaadatey tallaal kale 7dii maalmood ee la soo dhaafay?

Waxay khusaysaa oo kaliya kuwa qaadaneya talaalka AstraZeneca:

☐	☐	Waligaa miyaa lagaa heley xidada dhiiga oo liiga capillary leak syndrome?
☐	☐	Miyaad qaadey thrombosis (xinjirow) ay wehelisothrombocytopenia, (platelets oo hooseeya) mudo 42 maalmood kadib dhooskii hore ee AstraZeneca?
☐	☐	Miyaad waligaa qabtay xididka wadnaha ee ka keena sanka xinjirowga dhiigga (cerebral venous sinus thrombosis)? *
☐	☐	Miyaad waligaa qabtay heparin-induced thrombocytopenia? *
☐	☐	Weligaa dhiig xinjirow ma ku yeelatey xididdada caloosha (splanchnic veins)? *
☐	☐	Weligaa ma yeelatay antiphospholipid syndrome oo xidhiidh la leh xinjirowga dhiigga? *
☐	☐	Ma ka yar tahay 60 sano jir? *

* Pfizer ama Moderna ayaa la doorbidayaa kooxdan haseyeshee haddii aan tallaaladan la heli karin, AstraZeneca ayaa loo tixgalindoonaa haddii faa'iidooyinkooda tallaalku ka miisaan weyntahay halisyada.

Magaca:											
Lambarka Medicare:											

Wixii macluumaad dheeraad ah: eeg www.health.gov.au/resources/publications/patient-information-sheet-on-astrazeneca-covid-19-vaccine-and-thrombosis-with-thrombocytopenia-syndrome-tts.

Haddii aad uur leedahey, eeg www.health.gov.au/resources/publications/covid-19-vaccination-shared-decision-making-guide-for-women-who-are-pregnant-breastfeeding-or-planning-pregnancy.

Khuseysaa kuwa qaatey Pfizer ama Moderna oo kaliya:

☐	☐	Weligaa ma lagaa heley myocarditis iyo/ama pericarditis taas oo loo nisbeynayo dhooskii hore ee Pfizer ama Moderna?
☐	☐	Miyaad ma kugu dhacday mycarditis, pericarditis ama endocarditis lixdiibilood ee la soo dhaafey?
☐	☐	Ma qabtaa hada ma qabtaa acute rheumatic fever or acute rheumatic cudurka wadnaha?
☐	☐	Ma qabtaa wadnaha oo aad u daran?

Haddii aad Haa uga jawaabtay mid ka mid ah su'aalaha kor ku xusan, weli waxaad awoodi kartaa inaad heshid Pfizer ama Moderna, hase yeeshee waa inaad marka hore la hadashaa GP -gaaga, takhasuska tallaalka ama dhakhtarka wadnaha si aad ugala hadashid waqtiga ugu habboon ee tallaalka iyo haddii loo baahan yahay taxaddarro dheeraad ah.

Markii ugu dabeysey ee la cusbooneysiiyo: 8 October 2021

Magaca:												
Lambarka Medicare:												

Macluumaadka bukaanka

Magaca:	
Lambarka Medicare:	
Aqoonsiga Caafimaadka Shakhsiyeed (IHI) haddii lagu dabaqi karo:	
Taariikhda Dhalashada:	
Cinwaanka:	
Lambarka taleefanka:	
Cinwaanka emayl:	
Jinsiga:	
Luqadda looga hadlo guriga:	
Dalka dhalashada:	

Ma waxaad tahay Aborijinis iyo / ama Torres Strait Islander?

- ☐ Haa, Aborijiniska kaliya
- ☐ Haa, Torres Strait Islander kaliya
- ☐ Haa Aborijiniska iyo Torres Strait Islander
- ☐ Maya
- ☐ Doorbiday inaanan jawaabin

Ehelka xiga (haddii ay xaalad degdeg ahi dhacdo):	
Magaca:	
Lambarka taleefanka:	

Oggolaanshaha inaad helishid tallaalka COVID-19

- ☐ Waxaan xaqiijinayaa inaan helay oo aan fahmay macluumaadka layga siiyay talaalka COVID-19.
- ☐ Waxaan xaqiijinayaa aan in shuruudaha korka ku xusan midnaba, ama aan kala hadlay kuwan iyo / ama duruufo kale oo gaar ah bixiyaha daryeelka caafimaad ee joogtada ah iyo / ama bixiyaha adeegyada tallaalka.
- ☐ Waxaan oggolahay inaan helo koors ah tallaalka COVID-19 (laba qiyaasood oo isla tallaal ah).

Magaca:	
Lambarka Medicare:	

Magaca bukaanka:	
Saxeexa Bukaanka:	
Taariikh:	

☐ Anigu waxaan ahay masuul bukaanka ama go'aan-qaade beddelkiisa, waana oggolahay Tallaalka COVID-19 ee bukaanka kor lagu magacaabay.

Magaca Waalid / bedelka go'aan qaadaha:	
Saxiixa Waalid / bedelka go'aanka sameeyaha:	
Taariikh:	

Magaca:												
Lambarka Medicare:												

Adeeg bixiyaha:

Qiyaasta 1:

Taariikhda tallaalka la tallaalay:	
Wakhtriga la siiyey:	
Nooca tallaalka COVID-19 ee la siiyey:	
Lambarka dufcadda:	
Tirada taxanah:	
Goobta laga mudey:	
Magaca bixiyaha adeegga tallaalka:	

Qiyaasta 2:

Taariikhda tallaalka la tallaalay:	
Wakhtriga la siiyey:	
Nooca tallaalka COVID-19 ee la siiyey:	
Lambarka dufcadda:	
Tirada taxanah:	
Goobta laga mudey:	
Magaca bixiyaha adeegga tallaalka:	

Qiyaasta 3*:

Taariikhda tallaalka la tallaalay:	
Wakhtriga la siiyey:	
Nooca tallaalka COVID-19 ee la siiyey:	
Lambarka dufcadda:	
Tirada taxanah:	
Goobta laga mudey:	
Magaca bixiyaha adeegga tallaalka:	

*Haddii loo baahdo. Wixii macluumaad dheeraad ah eeg:
www.health.gov.au/resources/publications/atagi-recommendations-on-the-use-of-a-third-primary-dose-of-covid-19-vaccine-in-individuals-who-are-severely-immunocompromised

Markii ugu dambeysay ee la cusbooneysiiyay: 8 Oktoobar 2021

Magaca:												
Lambarka Medicare:												